Folkhälsomyndigheten
PUBLIC HEALTH AGENCY OF SWEDEN

WARBIXIN KU SAABSAN TALLAALKA OO KU SOCOTA WAALIDKA

DET HÄR ÄR EN ÖVERSÄTTNING TILL SOMALISKA AV FAKTABLADET DET SVENSKA VACCINATIONSPROGRAMMET FÖR VISSA BARN.

Tallaalada lagu la talinayo carruurta qaarkood

Dhammaan carruurta Iswiidhen waxay xaq u leeyihiin in laga tallaalo sagaal cudur oo halis ah (eeg qoraalka Barnaamijka tallaalka carruurta Iswiidhen). Dhammaan gabdhaha waxaa iyagana loogu deeqayaa in laga tallaalo infakshanka ku dhaca afka ilmagaleenka ah oo uu keeno fiiruska HPV (eeg qoraalka Tallaalka gabdhaha ee HPV). Carruurta qaarkood waxaa loogu deeqayaa in lacag la'aan looga tallaalo cagaarshowga nooca hepatit B, qaaxada, hargabka iyo infakshanka uu keeno pneumokock.

CAGAARSHOW NOOCA B

Cagaarshowga nooca B waa fiirus cudur ku rida beerka oo la isku qaadsiiyo dhiigga iyo dhacaanada kale ee jirka. Dadka qaarkood cudurkaas lagama dareemo halka qaar kale ay bilo badan aad u la xanuunsadaan. Dadka badankood waa ay ka caafimaadaan, laakiin qaar ayuu fiirusku muddo jirka uga jiraa oo mar dambe u keeni kara beer xanuun ama kansar beerka uga dhaca. Khatartu waxay ugu weyn tahay haddii cudurka lagu qaado carruur ahaan.

Yaa laga tallaalaa?

Tallaalka waxaa lagu la talinayaa carruurta ku sugan khatar dheeraad ah in ay qaadaan. Taasi waxay gaar ahaan khuseysaa carruurta la nool qoys ay dad ka mid ahi qabaan hepatit B ama carruurta waalidkood ka yimaadeen dalka uu cudurka hepatit B caadi ka yahay. Gobolada badankood waxay doorteen inay tallaal looga hortegayo cudurka hepatit B ugu deeqaan dhammaan carruurta.

Difaac noocee ah ayuu keenaa tallaalku?

Tallaalku waa mid aad wax ku ool u ah, badankood carruurta la tallaalay waxay yeeshaan difaac fiican. Waxayna u badan tahay in difaacaasi jiro nolosha oo dhan.

Goorma ayaa la tallaalaa?

Waxaa caadi ahaan la tallaalaa saddex mar oo kala duwan, iyadoo lala qaadanayo tallaalada kale sannadka ugu horreeya oo uu ilmuhu muluqa yahay (3, 5 ama 12 bilood jir) ama jadwal isaga u gaar ah.

Cilladahee laga yaaba in eey tallaalka ka imaan karaan?

Tallaalada cudurka hepatit B wuxuu carruurta badankood u keenaa cillado fudud oo qura. Wixii cillado ah waxay caadi ahaan ku baaba'aan dhawr maalmood gudahood. Cilladaha hoos ku qoran ayaa la soo weriyey:

Caadi ah (waxaa lagu arkaa ugu yaraan boqolkiiba la tallaalaba mid): Meesha cirbadda lagu duray oo gaduudata, bararta oo danqata.

Dhif ah (in ka yar kunkii la tallaalaba mid): xummad, cuncun, madax-xanuun, matag, shuban, finan, xasaasiyad.

QAAXADA

Qaaxadu waa infakshan ay keento bakteeriyo, laguna kala qaado hawada lagu qufaco. Cudurku wuxuu badanaaba ku dhaca sambabada laakiin wuxuu kaloo waxyeeli karaa xubnaha kale. Cudurkani badanaaba si tartiib ah ayuu u bislaadaa, isagoo wata qufac raaga, miisaanka oo hoos u dhaca iyo xummad, laakiin sanooyin ayeey bakteeriyadu jirka ku jiri karaa isagoo aan dillaacin. Qaaxada aan weli dillaacin la isma qaadsiiyo.

Yaa laga tallaalaa?

Waxaa in la tallaalo lagu la talinayaa carruurta ay qoysaskoodu ka yimaadeen dal uu cudurka qaaxadu caadi ka yahay.

Difaac noocee ah ayuu keenaa tallaalku?

Tallaalku wuxuu carruurta difaac wanaagsan ka siiyaa qaaxada noocyadeeda khatarta ah. Awoodda difaacu waa ay yaraata sannadba sannadka ka dambeeya.

Goorma ayaa la tallaalaa?

Tallaalku badanaaba waa mid hal mar la qaato laga soo bilaabo lix bilood jir, laakiin ka hor ayaa la siin karaa haddii loo arko in khatarta in uu qaado ay weyn tahay.

Maxaa dhacaya tallaalka kadib?

Tallaalku wuxuu keenaa in infakshan yar ku dhaco maqaarka, laba ilaa afar toddobaad kadibna waxaa meeshii laga tallaalay ku samaysma buro adag. Buradaasi waa ay ballaarataa oo gaduudataa, waqti kadibna waxaa ku samaysma nabar malax leh. Nabarkaas waa in aan la taataaban, isaga ayaa iska bogsoonaya dhawr toddobaad kadib. Waa in la iska ilaaliyo in lagu dabaasho waaskada dabaasha ilaa nabarkaasi jiro. Carruurta qaarkood weligood ma yeeshaan wax nabar ah, waxaase ka soo baxa buro adag oo bilo kadib baaba'da.

Cilladahee laga yaaba in eey tallaalka ka imaan karaan?

Cilladaha hoos ku qoran ayaa la soo weriyey:

Dhif ah (in ka yar kunkii la tallaalaba mid): Nabar si aan caadi ahayn u weyn oo ku bogsooda waqti dheer, xummad, madax-xanuun, xasaasiyad.

HARGAB

Hargabkani waa infakshan ku dhaca marinada neefta oo uu sababo fiirus. Waxaana laga qaadaa hawada uu ku qufacay ama hindhisay qof cudurka qaba. Xilli walba oo qaboobaha waxaa yimaada hargab, waxaana la bukooda in u dhexeysa boqolkiiba labo ilaa shan iyo toban bulshada. Hargabkaasi badanaaba isaga ayaa iska bogsooda laakiin wuxuu keeni karaa xanuun ku dhaca sambabada.

Ma in la iska tallaalaa?

Waxaa lagu talinayaa in carruurta caafimaad ahaan khatarta ugu sugan laga tallaalo hargabka xilliyada. Tallaalka hargabka waxaa laga sameeyaa fiirus lagu beeray ukunta digaagga. Haddaba qofka aad xasaasiga ugu ah ukunta waa inuu marka hore la hadla dhakhtarkiisa.

Difaacaasi ilaa intee ayuu jirayaa?

Maadaama uu fiiruska hargabku xilli walba isbeddelo waa in xilli walba la soo saaraa tallaal cusub oo wax ka qaban kara fiiruska xilliga cusub. Difaacaasi wuxuu ku baaba'aa sannad gudahiis oo waa in sannad walba la is talaala.

Goorma ayaa la tallaalaa?

Carruurta waxaa la tallaali karaa laga bilaabo lix bilood jir. Waxaa la tallaala hal ama labo qiyaas taas oo ku xiran hadba da'da ilmaha. Haddii la siinayo laba qiyaas oo tallaal ah waa in loo dhexeysiiyaa afar toddobaad.

Cilladahee laga yaaba in eey tallaalka ka imaan karaan?

Tallaalada cudurka hargabku wuxuu carruurta badankood u keenaa cillado fudud oo qura ama cilladba uma keeno. Wixii cillado ah waxay caadi ahaan ku baaba'aan dhawr maalmood gudahood. Cilladaha hoos ku qoran ayaa la soo weriyey:

Caadi ah (waxaa lagu arkaa ugu yaraan boqolkiiba la tallaalaba mid): Meesha cirbadda lagu duray oo gaduudata, bararta oo xanfafta, xummad.

Dhif ah (in ka yar kunkii la tallaalaba mid): xasaasiyad.

BAKTEERIYADA PNEUMOKOCKER

Pneumokocker waa bakteeriyo dhegaha iyo sanqada u keenta infakshan fudud, laakiin waxay kaloo bakteeriyadani sababi kartaa cuduro halis oo marar nafta khatar gelin kara oo ay ka mid yihiin caallir sambabada, dhiigga oo sumooba iyo caallir ku dhaca xuubka maskaxda. Waxaa kaloo jira khatar cillado ay ka mid yihiin dhaawacyo kala duwan oo gaara maskaxda.

Ma in la iska tallaalaa?

Waxaa 1dii jannaayo 2009 la hirgeliyey tallaal guud oo carruurta muluqa ah looga difaaco bakteeriyada pneumokocker. Dhammaan carruurta dhowaan dhalatay waxaa loogu deeqayaa tallaal lacag la'aan ah sannadka noloshooda ugu horreeya.

Carruurta la tallaalay iyo kuwa aan la tallaalin oo khatarta ugu sugan in ay aad ugu xanuunsadaan bakteeriyada pneumokocker waxay u baahnaan kaaran tallaal dheeraad ah iyadoo aan loo eegin da'. Waxay khuseysaa carruurta difaaca jirkoodu aad u hooseeyo ama qaba cuduro halis oo kordhin kara khatarta cudur halis ah.

Difaac noocee ah ayuu keenaa tallaalku?

Tallaalku wuxuu leeyahay difaac wanaagsan oo looga hortago cudur khatar ah oo ay sababi karaan noocyada bakteeriyada pneumokock ku jira talaalka.

Goorma ayaa la tallaalaa?

Carruurta ka tirsan kuwa khatarta ku sugan waxaa loo tallaalayaa si waafaqsan jadwal u gaar ah.

Cilladahee laga yaaba in eey tallaalka ka imaan karaan?

Tallaalka cudurka bakteeriyada pneumokocker wuxuu carruurta badankood u keenaa cillado fudud oo qura ama cilladba uma keeno. Wixii cillado ah waxay caadi ahaan ku baaba'aan dhawr maalmood gudahood. Cilladaha hoos ku qoran ayaa la soo weriyey:

Caadi ah (waxaa lagu arkaa ugu yaraan boqolkiiba la tallaalaba mid): Meesha cirbadda lagu duray oo gaduudata, bararta oo danqata, xummad, shuban, matag.

Dhif ah (in ka yar kunkii la tallaalaba mid): xasaasiyad degdeg ku soo baxda, cuncun, xummad kogid leh, finan cuncun leh, midabka jirka oo isbadala, tabardarri.

XASUUSNOW!

Tallaalka ka hor Sheeg haddii ilmahaagu xanuunsan yahay, qabo cudur dahsoon ama xasaasiyad, ama horay xasaasiyad uga muujiyey tallaaladii hore.

Tallaalka kadib Haddii ilmaha caafimaadkiisu liito tallaalka kadib waa inaad la xiriirtaa rugta daryeelka caafimaadka carruurta, rugta caafimaadka ardayda ee dugsiga ama isbitaalka. Shaqaalaha goobaha caafimaadku waxay dadka ku wargelinayaan dhammaan qoonsiga tallaalka la xiriira, taas oo aan loo eegin in tallaalku sababay iyo in kale.

Si dhab wax uga ogow tallaalada ilmahaaga lagu sameeyey oo ku qoran kaarka ama buugga BVC ama hab kale u ogow.

FOLKHÄLSOMYNDIGHETEN, JULI 2017 ISBN PRINT 978-91-7603-713-3 ARTIKELNUMMER: 16087 GRAFISK PRODUKTION: AB TYPOFORM

Folkhälsomyndigheten
PUBLIC HEALTH AGENCY OF SWEDEN

Solna Nobels väg 18, 171 82 Solna **Östersund** Forskarens väg 3, SE-831 40 Östersund.
www.folkhalsomyndigheten.se